Waa Maxay Baaritaanka iyo Latalinta Cusub ee HIV-ga?

Meelo Dheeraad ah oo Qarsoon ee Baaritaanka Lagu Sameeyo

Maamulka Ontario waxay dhawaan oggolaadeen 24 meelo dheeraad ah oo lagu sameeyo baaritaan qarsoon, taasoo tirada guud ka dhigaysa 50, islamarkaana kordhinaysa in laga helo meelo badan oo gobolka ka tirsana meelaha qarsoon ee HIV-ga lagu baaro. Takhaatiirta oo aan qabin waqtiga ama waayo aragnimada lagu sameeyo baaritaanka HIV-ga waxay macaamiisha u diri karaan isbitaalka caafimaadka dadweynaha ee caafimaadka galmada ama barnaamijka baaritaanka qarsoon.
Waxaad kala soo xiriirtaa AIDS Hotline (Khadka Degdegga ee AIDs-ka) 416-392-2437 ama 1-800-668-2437; khadka af Faransiiska si aad u ogaatid meelaha ay ku yaalliin iyo lambarrada taleefoonada goobaha baaritaanka qarsoon lagu sameeyo: 1-800-267-7432.

Halkeey Ku Yaalliin Meelaha Qarsoon ee Baaritaanka HIV-ga Lagu Sameeyo?

22 waxay ku yaalliin goobaha caafimaadka dadweynaha.

16 waxay ku yaalliin xarumaha caafimaadka dadweynaha.

4 waxay ku yaalliin xarumaha umulisada (waxaa isticmaala macaamiishooda oo kaliya).

3 waxay ku yaalliin xarumaha caafimaadka galmada.

5 waxay ku yaalliin meelo kale – isbitaalka, hay'adda dhallinyarada, laba hay'adadaha Dhaladka Asalka ah iyo kooxda caafimaadka qoyska.

Baaritaano Dheeraad ah oo Kala Duwan

Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Muddada Fog waxay suurageliyeen helitaanka goobta daryeelka bilaashka ah loogu baaro HIV-ga, isbitaallada caafimaadka dadweynaha ee caafimaadka galmada iyo xarumaha caafimaadka dadweynaha oo go'aansadeen in ay sameeyaan baaritaanka noocaan ah. Goobta daryeelka bilaashka ah, waxay dadka cudurka qaba ku ogaanayaan dhowr daqiiqado marka lagu sameeyo baaritaanka kaddib. Kaddib marka baaritaanka looga qaado goobta daryeelka, dadka ay natiijada baaritaankoodu dabagalka u baahan tahay waa in baaritaan xaqiijin ah looga qaado shaybaarka caadiga ah, waxayna noqonaysaa in ay sugaan laba asbuuc si ay natiijada u helaan. (Fiiro Gaar ah: waqtiyada ay qaadato helitaanka natiijooyinka baaritaanka waa ay ku kala duwan yihiin gobollada.) Waxaa intaasi dheer, in haatan sheybaarka caafimaadka dadweynaha ay si joogta ah tijaabo kasta ku sameeyaan baaritaanka p24 antigen kaasoo foomka codsiga uu tilmaamayo in uu qofka ku guda jiro xilliga qaaditaanka iyo xaqiijinta cudurka, islamarkaana uu qabo calaamadaha IYO in uu khatar badan ugu jiray.

Aqoonta Dheeraadka ah ee ku Saabsan Khatarta

Waxaannu ogsoonahay in

- Gabdhaha (tus., ka yar 18 sano) ay kaga khatar badan yihiin dumarka ka da'da weyn in uu ku dhaco HIV-ga Sababtoo ah unugyada ilmo galeenka si fiican uma sameysmaan illaa laga gaaro 18 sano.
- Caafimaadka xuubka dheecaanka ee daloollada (mucosal membrane) waxaa saameeyn ku yeesha jiritaanka cudurrada kale ee galmada lagu kala qaado hurgunada (STIs), heerka hoormoonka dumarka, dheecaan la'aanta iyo isticmaalka waxyaabaha cun-cunka keena.
- Fayraska yar wuu yareeyaa hase ahaatee ma baabi'iyo khatarta lagu kala qaado HIV-ga. Daawooyinka fayruska dila marwalba ma gaaraan heer sarreeya ee xubnaha galmada looga hortagaayo HIV-ga. Waxay khatarta korodhaa haddii uu qofka qabo hurgun kale oo ah cudurrada galmada lagu kala qaado.
- Qalabka maadooriyeyaasha lagu qaato waxay leeyihiin khatar in HIV la isugu gudbiyo (weliba irbadaha), sida kariyeyaasha, filtarrada, biyaha, suufka aalkolka, xarigga dhiigga celiya, beybka maandooriyaha *crack* iyo tuubooyinka dhalada ka sameysan.

Garashada Ballaaran ee Khatarta/Marxaladaha Bulshada

Awoodda ay dadku ku heshiiyaan qaabka badbaadada leh ee galmada iyo isticmaalka maandooriyeyaasha waxaa saameyn ku leh marxaladaha bulshada ee caafimaadka, sida faqriga, guriyeenta, kala duwanaanta xiriirrada, isticmaalka maandooriyaha ama khamriga iyo magic xumada. Arrimaha dadka horyaal waxay ku kala duwan yihiin da'da, dooqa galmada, dhaqanka iyo jinsiga.

Ontario

Latalinta waxtarka leh ee ka hortagga waa in ay caadi ahaan arrimahaan tixgeliso. (Waxaad ka eegtaa Lifaaqa 2 wada hadallada ku saabsan arrimaha gaarka ah ee dadweynaha.)

Muhiimadda Cudurrada Kale ee Galmada Lagu Kala Qaado (STIs) iyo Baaritaanka *Hepatitis* C

Qayb wax ku ool ah ee ka tirsan dadweynaha khatarta ugu jira HIV-ga ayaa sidoo kale khatar ugu jira cuduraada kale ee galmada lagu kala qaado (STIs) iyo hepatitis C. Qof kasta ee u yimaada baaritaanka HIV waa in wareysi lala yeesho qiimeyn lagu sameeyaa cudurrada kale ee galmada lagu kala qaado (STIs) iyo hepatits C, oo loo soo jeediyaa in baaritaan laga qaado.

Waqtiga uu Qaadanaayo Baaritaanka HIV-ga

Wareysiga baaritaanka HIV hortiisa wuxuu qaataa 15 illaa 20 daqiiqadood; hase ahaatee, waqtiga waa uu kala duwan yahay iyadoo ay ku xiran tahay heerka aqoonta ee macaamilka iyo baahida kale.

Waajibaadka Sharciga ah ee Lagu Ogeysiinaayo Rafiiqyada/ Saaxiibada Mustaqbalka

Sanooyinkii dhawaa ee la soo dhaafay, dhowr qof oo qaba HIV ayaa lagu xukmiey falal dembiyo ah ee la xiriiray in ay falalka galmada ee leh khatarta lagu kala qaado HIV ay la yeesheen rafiiqyadooda/saaxiibadooda iyagoo aan la socodsiin in ay qabaan HIV-ga. Dadka la xaqiijiyey in ay qabaan HIV waa in ay haatan u sheegaan rafiiqyadooda/saaxibadooda in ay qabaan HIV inta aysan wada sameynin falalka khatarta xambaarsan, sida galmada siilka ama futada ee aan la iska badbaadin – haddii aysan sidaan dhicin, oggolaashada rafiiqa ee galmada ku saabsan ansax ma noqonayso waxaana suuragal ah in eedeyn lagu soo rogo qofka qaba HIV-ga. Sharcigu weli ma caddeynaayo falalka kale ee khatarta weyn keenaya. Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho waajibaadka sharciga ah ee lagu ogeysiinaayo rafiiqyada mustaqbalka qabitaanka HIV-ga, waxaad la xiriirtaa *HIV & AIDS Legal Clinic (Ontario) (HALCO)*: 416-340-7790; 1-888-705-8889; www.halco.org.

Caawinaadda ku Saabsan Luqadda

Khadka Degdegga ee AIDS-ka wuxuu warbixin ku bixiyaa 18 luqadood waxayna qabaan shaqaale u turjuma marka ay lataliyeyaasha ku hadlin luqadda macaamiisha. Waxay aqoon fiican u leeyihiin arrimaha la xiriira baaritaanka HIV-ga waxayna leeyihiin faa'ido badan. (Taleefoonada Khadka Degdegga ee AIDS-ka: 416-392-2437 ama 1-800-668-2437; khadka af Faransiiska: 1-800-267-7432.)

Bishii Jannaayo 2008, Khadka Degdegga ee AIDS-ka waxay adeeg ku bixiyeen luqadaha soo socda:

Armenian
Bengali
Cantonese
English
Filipino
French
Hakka
Hindi
Mandarin
Portuguese
Russian
Sinhalese
Spanish
Swahili
Taiwanese
Tamil
Urdu
Vietnamese

Taageerada Ogeysiinta Rafiiqa/Saaxiibka

Xafiiska Maamulka AIDS waxay haatan ku hawlan yihiin soo saaridda tilmaamo tifaftiran ee ku saabsan ogeysiinta rafiiqa/saaxiibka oo ka caawini doonta lataliyeyaasha wax ka qabadka arrimaha dhibka badan.

Liisaska Warbixinta iyo Qalabka Kale

Qoraalka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Muddada Fog ee *Guidelines for HIV Counselling and Testing* (Tilmaamaha Latalinta HIV-ga iyo Baaritaanka) waxaa ku yaal waxyaabo dhowr ah, sida liiska warbixinta ee wareysiga baaritaanka ka hor, tusmada tilmaamaha galmada badbaadada leh, talooyin ku saabsan suuragelinta baaritaanka wanaagsan.

Wax dheeraad ah ka baro baaritaanka adigoo eegaya bogga internetka,
SayYesToKnowing.ca

Somali Catalogue No. CIB-6153457 March/08 © Queen's Printer for Ontario